


C.risaq Faarax Cawad
www.youtube.com/c/waxkabarro
Wax Ka Barro Channel
Copyright © 2016

# Contents

Xog Buuga ku Saabsan .......... 4

Sheekadii guusha ee Morgan Freeman. .......... Error! Bookmark not defined.

Sheekadii Morgan Freeman .......... 6

Casharada laga bartay noloshii Morgan Freeman. .......... 7

Sheekadii Ramesh Babu .......... 8

Casharada laga baranayo sheekadan Ramesh .......... 9

Sheekadii Guusha Jack Ma (Alibaba.com) .......... 10

Waayihii iyo Noloshii uu maray Jack Ma .......... 12

Sheekada aynu ka baranay Jack Ma Story .......... 12

Sheekadii guusha ee Oprah Winfrey .......... 13

Ma Waxaad Ku Nooshahay Nolol Adag? .......... 13

Sideey guusha u Gaadhay Oprah Winfrey .......... 14

Casharada Laga Barran karo Sheekada Oprah Wenfrey: .......... 15

Sida Loo Noqdo Caan iyo Taajir (Sheeko Dhab Ah) .......... 16

Go'aan Qaadashada, Rajada Adag iyo Adkayasiga .......... 16

Lacagta iyo Caanimada .......... 17

Casharadii laga bartay Joanne .......... 18

Sheekadii Guusha Ee Dhirubhai Ambani .......... 19

Casharada laga barran Karo Sheekada Dhirubhai Ambani .......... 20

Sheekadii guusha ee Coca-cola .......... 21

Casharada laga baran karo sheekadan ? .......... 22

Bal adiga kawaran? .......... 23

Sheekadii Guusha Ee Nic Vujicic .......... Error! Bookmark not defined.

Sida Loo Helo Waxaad Rabto Nolosha Adoon u Eegayn Waxaa aad haysato. .......... 24

Sheekadii Guusha Ee Subhreet Kaur .......... 26


Copyright © 2016

Miyay Waxyaabo Aad Xadaysatay Dib Kaaga Hayaan inaad ku guulaysato hadafkaaga ? .......... 27
Curyaanimada Dhabta ah .......... 29
Sheekada Dhiirigalinta leh ee Larry Swilling .......... 29
Waayihii adkaa ee uu Larry waajahay ! .......... 31
Bal hadaba adigu isku noqo .......... 32
Sheekadii Ganacsade Somali ah Oo ku Taajiray 15 Dollar .......... 33
Casharada aan ka barran karno sheekadan: .......... 34
Miyaad ka habsaantay waqtigii guul ka gaadhi lahayd nolosha (sheeko) .. 35
Sii wadistii riyada .......... 36
Casharada Aadka u Qaaliga ah ee aan ka baranay sheekadan .......... 37


Copyright © 2016

# Xog Buuga ku Saabsan

Haddii ay dhab kaa tahay oo aad u jeelantahay inaad noqoto qof guulaysta nolosha, waxa ugu fiican eed samayn kartaa waa inaad naftaada barto sheekooyinka dhiirigalinta leh ee dadka caanka ah ee guusha gaadhay.

Dad badan oo raba inay guul ka gaadhaan noloshooda, ganacsigooda ama shaqadooda ayaa ku fashilma sababtoo ah magaranayaan intay qofka ku qaadato inuu guul gaadho iyo sida wadada guushu u eegtahay. Waxay arkaan oo kaliya natiijada ugu dambaysa taasi oo ah qofkoo guul gaadhay, iyagoon wax fikir ahba ka haysan wixii uu qofkani soo maray.

Ujeedada buugan aan u qoray waxay tahay inaad  waxbadan ka ogaato sheekooyinka dhiirigalinta leh ee dadka guulaha gaadhay iyo sidoo kale inaad barato sida wadada guushu u eegtahay iyo dabeecadaha aad u baahantahay inaad yeelato si fursadaha aad guul ku gaadhaysaa ay noqdaan qaar aad u sareeya.

C.risaq Faarax Cawad
www.youtube.com/c/waxkabarro
Wax Ka Barro Channel
Copyright © 2016

## HORDHAC

Hadii aad u jeelantahay inaad guul ka gaadho nolosha, waxa ugu fiican ee aad samayn kartaa waxay tahay inaad naftaada barto sheekooyinkan dhiirigalinta leh ee dadkii guulaha gaadhay caankana noqday.

Dad badan oo raba inay guul ka gaadhaan noloshooda, shaqadooda, iyo ganacsigooduba way ku fashilmaan sababtoo ah magaranayaan intay qofka ku qaadato inuu guul gaadho iyo sida ay wadada guushu u eegtahay, waxay arkaan oo kaliya natiijada ugu dambaysa oo ah qofkii oo guul gaadhay iyagoon wax fikir ah ka haysan waxa uu qofkani soo maray noloshiisa.

Haddii aad ogaato sheekooyinka dhiirigalinta leh ee dadkii guulaha gaadhay, waxaad hanan doontaa qaab fikirkoodii,waxaanad sidoo kale baran doontaa sida ay u eegtahay wadada guushu, fursadaha aad nolosha guul ku gaadhi kartaana waxay noqon doonaan qaar aad u heersareeya.


Copyright © 2016

## Sheekadii guusha ee Morgan Freeman

Sababta dad badani uga aaminsan yihiin fikir qaldan guushu waa iyagoo arka uun natiijada ugu dambaysa ee shaqo adag oo uu qof soo qabtay, isla markaana umaleeya inay nasiib ahayd.

Wali ma maqashay sheekada nin la yidhaa Morgan Freeman.

Haddii aad waxbadan daawato filimada hollywood-ka waxa laga yaabaa inaad ogtahay inuu ka mid yahay aktarada hollywoodka loogu tixgalinta badan yahay, ee ku guulaystay marar badan bilada filimada ee loo yaqaano ( Oscar prize).

Taasi waa waxay dhab ahaan ka yaqaanaan dadku agteerkan, balse wax fikrad ah maka haysataa halgankii uu soo maray ka hor inta aanu noqon akteer caan ah oo guulo waawayn gaadhay.

## Sheekadii Morgan Freeman


Morgan freeman wuxuu ku dhashay dalka maraykanka taariikhdu markay ahayd 1937, waqtigaasi oo ku beegnaa waqtigii midab takoor lagu hayay dadka madoobi uu aad u xooganaa. Iyadooy ay ugu wacan tahay dhibaatadan iyo cadaaadiskaa midab takoorka, qoyskiisii waxay go'aansadeen inay u guuraan meel kale si ay u helaan nolol ka fiican ta  waqtiga ka jirtay dalkooda.

Morgan wuxuu jeclaa inuu noqdo aktar, lacagtiisa iyo waqtigiisa inta ugu badana wuxuu ku bixin jiray si uu u daawado aflaamta. Marar badan waxa uu isku dayay inuu noqdo aktar balse kumuu guulaysan. Waqti aad u dheer kadibna wuxuu is arkay isagoo duuliye ama pilot ka ah diyaaradaha milateriga.

Waqti kadib Morgan wuxuu xaqiiqsaday in mihnada uu dhab ahaan u jecelyahay ay tahay akteernimada, waxaanu go'aansaday inuu daba socdo oo aanu ka hadhin sidii uu actar u noqon lahaa. Morgan da'diisii waxay gaadhay 45 jir isagoon wax guul weyn ah gaadhin. Laakiin muu niyad jabi wuxuu sii wado iskudaygiiba, wuxuu guulaystay markay da'diisu gaadhay 50 jir ilaa uu kama dambaystii matalay filimada caanka.


Copyright © 2016

Markay da'diisu noqotay 67 jir Morgan Freeman wuxuu ku guulaystay bilada aflaamta kadib jilidiisii loo wada bogay ee filimkii la magac baxay "Million dollar baby"



.

Casharada laga bartay noloshii Morgan Freeman.

1) Waxaad u malaynaysaa inaad ka habsaantay xiligaad riyooyinkaaga eryan lahayd? Wuxuu guul gaadhay markay da'diisu noqotay 67 sano jir: ma u malaynaysaa inaad da'a waynaatay? Morgan freeman wuxuu bilaabay inuu guulaysto markii ay da'diisu noqotay 50 jir. Haddii aad u jeelantahay oo aad jeceshahay inaad ku guulaysato wax, wali maad habsaamin.
2) Ma Nasiibaa ? mise waa Adkaysi ?: qofku si uu guul u gaadho waa inuu la kulmaa guul darooyin badan. Morgan Freeman wuxuu guuldaraystay marar badan ilaa ay da'diisu gaadhay 40 jir isagoon wax guul ah gaadhin, balse maadaama oo uu ah qof aad u adkaysi badan wuxuu maareeyay inuu ku guulaysto riyadiisii markuu 50 jir gaadhay. Dhinaca kale arintani nasiib ma'aha balse waa ku celcelin badan ilaa aad ka gaadhayso waxa aad rabto.
3) Raac Oo ka shaqee waxa aad jeceshahay: kuma lihi kuma guulaysan kartid shay haddii aanad jeclayn balse dhab ahaan waxay noqon doontaa mid aad kuugu fudud inaad ku guulaysato waxaad jeceshahay marka la barbardhigo ku guulaysiga wax aad neceb tahay. Hel waxa aad


Copyright © 2016

jeceshahay inaad qabato oo raac, haddii aad saa samayso fursadaha aad ku guulaysanayaan waxay noqonayaan qaar aad u heersareeya.

## Sheekadii Ramesh Babu

Ramesh waa nin reer india ah oo milyaneer ah, kaasi oo leh shirkad kiraysa baabuurta oo ay baabuurtiisu gaadhayaan 300 boqol oo gaadhi.

Haddii aanad fikir iyo aaminsanaan fiican ka haysan guusha waxa laga yaabaa inaad u malayso in Ramesh uu ahaa qof nasiib leh ama qof ay ku caawiyeen qoyskiisu inuu aasaaso ganacsigaa, balse xaqiiq ahaa Ramesh wuxuu tusaale sax ah oo ku tusaya sida dhiiranaanta iyo go'aanku ay uga badiyaan waxkasta oo kale.

Ramesh wuxuu ka shaqayn jiray meel raysle ama timo jare ah kaasi oo adeerkii lahaa, wuxuuna maalinta dhan ku shaqayn jiray 5 rupi oo waqitagaa ahayd lacag aad u yar. Ramesh wuxuu tagi jiray rayslaha aroortii,waxbarashada oo uu college ka dhigan jirayna wuxuu tagi jiray casarkii, intaa kadibna wuxuu ku noqon jiray rayslaha waxaanu ka shaqayn jiray ilaa kowda habeenimo.

Ramesh wuxuu saddexda waqti ee wax la cuno wax cuni jiray hal waqti oo kaliya si uu u noolaado, sababtoo ah muu heli jirin lacag ku filan oo uu ku iibsado cunto kale.

Maalin maalmaha kamid ah ayuu Ramesh isku darka lacagtii uu kaydsanayay iyo lacag uu soo amaahdayba qaaday oo uu ku iibsaday gaadhi. Ramesh wuxuu bilaabay inuu kireeyo baabuurtii si uu lacag uga sameeyo oo ay lacagi uga soo gasho.

Wax yar kadib wuxuu yeeshay lix gaadhi oo uu kireeyo waxaanu wax badan xidhiidh la yeeshay xaga ganacsiga kiraynta. 2004 wuxuu bilaabay inuu iibsado gaadhi nooca lagu raaxaysto ah oo uu ka kireeyo dadka. Waqtigaa dadku may kiraysan jirin gawaadhiga lagu raaxaysto, qofkastaana wuxuu u sheegay inuu qalad weyn sameeyay.


Copyright © 2016

Ramesh wuxuu u cadeeyay dadkii inuu isagu saxsanaa, ganacsigiisiina wuu sii koray. Markuu waqtigu ahaa 2011 wuxuu bilaabay inuu ku soo daro ganacsigiisii oo uu soo iibsado gawaadhida loo yaqaano Rolls Royce, mar labaad dadkii waxay u sheegeen inuu qalad aad u weyn samaynayo.

Ramesh mar labaad wuu saxsanaa. Wuxuuna noqday milyaneer gawaadhidiisuna waxay gaadheen in ka badan 300 oo baabuur noloshiisiina gabi ahaanba way isbadashay.




## Casharada laga baranayo sheekadan Ramesh

1) Noloshu way adagtahay, sida awgeed maxaa kula gudboon?: hadaba ma umalaynaysaa inaanad ganacsi bilaabi karin sababtoo ah wax lacag ah ma haysatid, ama sababtoo ah wax waqtiya mahaysatid. Ramesh wuxuu wax baranayay maalinta oo dhan, maalintii wuxuu helayay lacag 5 rupe ah. Waxaad haysataaa wax ka badan inta uu haystay Ramesh, haddii aad umalaynayso inay noloshaadu adagtahayna waxaad ogaataa in dadkii noloshoodu kaa sii xumayd ay sameeyeen oo gaadheen guul.
2) Badanaa waxaa jiri doona qof ku niyad jabiya oo hoos kuu dhiga: ka hor intii aanu qaadin labadii talaabee ugu muhiimsanaa mihnadiisa, dadku waxay u sheegeen inuu ku socdo jiho qaldan balse muu dhagaysan dadkaa. Tana waa waxa saxda ah ee ay dadka guusha gaadhaa sameeyaan. Waxay raacaan riyooyinkooga iyo waxay gaadh isleeyihiin xataa haday dad badani isku dayayaan inay ka joojiyaan.


Copyright © 2016

3) Dib u dhacyo aad u xun: wadadii guusha uu u maray Ramesh may ahayn mid toosan oo ubaxyo iyo roog cas loo dhigay. Waraysi lala yeeshay mar ayaa waxa uu sheegay inuu waajahay dib u dhacyo badan tana waa waxa aad dhab ahaan u waajihi doonto. Waxa ogaataa oo kaliya in dib u dhacyadu yihiin wax ka mid ah nolosha ganacsadaha.
4) Dadka qaar waxay sameeyaan cudur daaro dadka kalena hore ayay ka qabtaan: haddii Ramesh aanu waligii guulaysan lahayn, oo uu u sababayn lahaa guuldaradiisa cudurdaaro, cudur daaradaasi waxay noqon lahaayeen qaar macquul u ah dad badan. Hadaba waxaasoo dhan kadib, muxuu samayn karaa qof ku nool xaalada sidan u adagi si uu u horumariyo noloshiisa? Ramesh wuxuu cadeeyay in go'aan qaadashada iyo shaqada adagi ay u badali karaan nolol kasta dhinaca fiican.


Copyright © 2016

# Sheekadii Guusha Jack Ma (Alibaba.com)

Jack Ma waa muwaadin u dhashay dalka china, kaasi oo ku guuldaraystay inuu ku biiro college-ka tiraba saddex jeer, ugu dambayntiina wuxuu si dirqiya ku dhaafay imtixaankii kadib markii uu sameeyay diyaarin iyo dadaal caadiga dhaafsan.

Wuxuu isku dayay inuu shaqo ka helo maqaaxi cuntada lagu kariyo, laakiin badankoodii way diideen inay shaqada galiyaan. Kadib markii uu codsiyo badan oo shaqo ah meelo kala duwan u dirsaday ee loo diiday ayaa wuxuu go'aansaday inuu shaqo macalinimo raadsado sababtoo ah wuu ku guuldaraystay inuu shaqo taa dhaanta helo.



Jack Ma wuxuu dhigi jiray luuqada English-ta isagoo qaadan jiray lacag ka yar 10 dollar bishiiba.

Ka hor intii aanu bilaabin dhigista luuqadan, Jack Ma wuxuu aad u jeclaa inuu horumariyo habka uu ugu hadlayo luuqadan, waxaanu 45 daqiiqo u kaxaysan jiray baskiishiisa maalin walba Huteel u dhaw oo ay dadka dalxiisayaasha ahi ku soo dagi jireen si uu ula hadlo luuqadana English-tana iskaga dhiso.

Jack Ma kumuu qanacsanayn shaqadiisa, waxaanu go'aansaday inuu u guuro dalka maraykanka, si uu u helo nolol ka fiican tii uu ku noolaa. Wuxuu bartay computer-ka iyo internet-ka aad baanu u jeclaa. Markii dambana wuxuu


Copyright © 2016

aasaasay website-ka loo yaqaano ALIBABA.COM  kaasi u saamaxay ganacsiyada iyo shirkadu ay ku kala ganacsadaan iskuna dhaafsadaan alaabta si online ah.

Alibaba wuxuu noqday ninka ugu taajirsan dalka china, hantidiisana maanta waxaa lagu qiyaasaa 21 billion dollar. Waxaa loo aqoonsaday inuu kamid yahay 25 ganacsade ee ugu awooda badan qaarada eeshiya.

## Waayihii iyo Noloshii uu maray Jack Ma

Jack Ma muu haysan wax lacag ah oo uu ku bilaabo ganacsi. Wuxuu ku shaqayn jiray mushahar aad u yar. Waxaanu si dirqiya ugu biiray oo uu ugu guulaystay inuu ku biiro machadka tababarka macalimiinta. Intaa waxa dheer in wadanka shiinuhu aanu waqtigaa ahayn meel ku fiican in lagu noolaado ganacsina laga bilaabo.

Jack Ma dhaqaalihiisii iyo lacagtuu haystay sanadihiisii ugu horeeyay kamay badnayn intaad haysato maanta, haddii aanay intaad haysataa kaba badnaynba. Ninkani wuxuu aad u jeclaa oo kaliya inuu abuuro ganacsi guulaysta taasina waa sababta uu u raacay riyadiisii aanu u xaqiijiyay.

Hadaba waa maxay cudur-daarada aad maalin walba naftaada u sheegtaa? Lacag kugu filan mahaysatid? Waxbarasho fiican ma haysatid? Dadka kugu xeerani kuma dhiirigaliyaan kumana garab istaagaan?

Jack Ma muu haysan qof dhiirigaliya oo cadaadiya balse damacaa xoogan ee ku gubayay si uu guul u gaadho ayaa ka dhigay ninka uu maanta yahay.

## Sheekada aynu ka baranay Jack Ma Story

1) Waa suurto gal: waxaa suurto gal ah inaad ka bilawdo ganacsigaaga meel aad u hooseeysa oo aad noqoto bilyaneer (maahaba milyaneeer) Jack Ma wuxuu tusaale fiican u yahay dadka ka soo bilaabay meel ka hooseysa zero iskuna daray liiska ugu sareeya ee taajiriinta adduunka.
2) Horaa loo samayn karaa: sharci ma'aha balse horaad ugu guulaysan kartaa. Jack Ma wuxuu gaadhay guul isagoo ku jira da'diisa 30 meeyaha.
3) Marka ay riyadaada iyo hamigaagu weyn yahay, waxyaabaha hoose kuma dhibi doonaan: Jack Ma wuxuu ku noolaa nolol adag, muu ahayn


Copyright © 2016

qof ku nool nolol raaxo leh, muu lahayn gaadhi iyo baan ay lacagi u taalo toona balse wuxuu u cadeeyay aduunka in haynta iyo dhaqaaluhu aanay aanay caqabad ku noqon doonin haddii riyadaada iyo hadafyadaadu ay waaweyn yihiin.

## Sheekadii guusha ee Oprah Winfrey

### Ma Waxaad Ku Nooshahay Nolol Adag?

Ma u malaynaysaa in noloshaadu adagtahay?

Ma u malaynaysaa in aanad guulaysan karin sababtoo ah faqiir baad tahay? Ama sababtoo ah malihid hanti kugu filan?

Hadaba waxyar sug hadaad saa moodaysid ilaa aad ka arkaysid sheekada noloshii Oprah. Oprah waxay ka dhalatay qoys faqiiriin ah. Hooyadeed iyo aabeeheed waxay ahaayeen qaar markasta isdagaala oo isfahan fiicani aanu dhex oolin ugu dambayntiina kala tagay. Oprah waxaa loo diray ayaydeed si ay ula noolaato.

Waqti kadib Oprah waxaa dib loogu diray hooyadeed, taasi oo aan siin jirin daryeel iyo dareen badan. Waxaan umalaynayaa inaad sawiran karto dhibaatada ay leedahay waalidkii ku dhalay oo iska kaa fogaynaya kuna ignore-garaynaya. Oprah waxay dareentay inaan la jeclayn waxaanay bilawday inay istcimaasho daroogooyin iyo maandooriyayaal si ay iskaga yarayso murugada iyo xanuunka niyadeed ee haystay.

Waqti kadib Oprah waxaa loo diray aabaheed si ay ula noolaato, kaasi ahaa nin aad u ad-adag. Inkastoo aabaheed ninkaa ad-adag hadana wuxuu ka caawiyay sidii ay iskaga joojin lahayd daroogooyinka ay isticmaalayso oo ay xooga u saari lahayd dhisida mustaqbalkeeda.

Oprah waxay heshay shaqo wariye-nimo ah balse waxyar kadib shaqadii waa laga eryay waxaana loo sheegay in aanay ku haboonayn inay TV ka shaqayso. Sideed dareemi lahayd haddii uu qof kuu sheego in aanad ku haboonayn inaad wax qabato? Isagoo qofka sidaa kuu sheegaya uu yahay qof waxaa khabiir ku ah ?


Copyright © 2016

Miyaad quusan lahayd oo aad rajo dhigi lahayd? Oprah may quusan manay rajo dhigin.

## Sideey guusha u Gaadhay Oprah Winfrey

Oprah markii dambe waxaa lagu casuumay inay marti galiso bandhig laga sii daynayay TV oo soconayay 30 daqiiqo. Sanad gudihii bandhigii wuxuu noqday mid caan noqda waxaana la kordhiyay waqtiguu soconayay iyadoo laga dhigay saacad.

Intaa kadib bandhigii ama show-gii waxaa loogu magac daray "Oprah Winfrey Show" ama bandhigii Oprah Wenfrey. Intaa kadib Oprah waxay noqotay 1-aad uguna horeeya ee martigaliya bandhigyada TV yada laga hadlo iyo mid kamid ah dadka ugu caansan ee ka hadla TV-yada.

Dhinaca dhaqaalaha Oprah waxay noqotay bilyaneer. Waa mid ka mid ah dumarka aad ku tirada yar ee qaatay ciwaanka bilyaneer-nimada.

Waxaa jira xog aad uga badan oo la taxaluqa sheekada Oprah balse su'aasha iswaydiinta lihi waxay tahay maxaan kuugu sheegayaa sheekadan?

Sababtu waxay tahay, waxaan ogahay inay jiraan dad badan oo ku liiday hoosna kuu dhigay, kuuna sheegay inaanad wax qaban karin isla markaana aanad ku fiicnayn.

Sidoo kale waxaan rabaa inaan kuu sheego in dadka guusha gaadhaa ay badanaa la kulmaan diidmooyin la mid ah diidmadan ka hor inta aanay guulaysan.


Copyright © 2016



Casharada Laga Barran karo Sheekada Oprah Wenfrey:

1. Wax dareen ah ha siin Diidmada: Ma Lagu diiday? Dhoola cadee oo iska dhaqaaji siina wad socdaalkaaga,  haddii aad hore u sii socoto waxaad u cadayn doontaa kuwii ku diiday inay qaldanaayeen.
2. Fikrada ay dadka khabiirada ahi ku siiyaan micno weyn malaha : Oprah qofka diiday muu ahayn hooyadeed amase qof ay saaxiibo yihiin, balse waxaa diiday qof khabiir ku ah oo wax badan ka yaqaana warbaahinta una sheegay inaanay shaqadan ku soo baxayn! Hadana ay u cadaysay in fikirkiisu uu gabi ahaanba qaldanaa. Waxa laga yaabaa in xataa dadka khabiirada ahi ay ku guuldaraystaan inay arkaan aragtidaada mustaqbaleed iyo qorshayaashaada waaweyn. Raac riyooyinkaaga horena ugu soco.
3. Raac riyooyinkaaga: Oprah muu niyad jabin faqrigii haystay, daryeel la'aantii waalid ee haysatay iyo xataa diidmooyinkii adkaa ee lagala hor yimidayba. Iyadoon waxaa u joojinayn ayay hore u socotay ilaa ay ka guulaysatay.


Copyright © 2016

# Sida Loo Noqdo Caan iyo Taajir (Sheeko Dhab Ah)

Noloshii adkayd ee Joanne

Joanne waxay dhalatay 1965, waxaanay ku dhalatay tuulo yar oo sabool ah ku taala dalka Ingiriiska. Ilaa bilawgii horee nolosheeda waxay aad u jeclayd inay qoraa noqoto, waxaanay qortay sheekadeedii ugu horeysay markii ay 6 jir ahayd.

Markii ay Joanne waynaatay nolosheedii way sii adkaatay. Waxaanay noqotay carmal (sigle mom), aad bay sabool u ahayd hooyadeedna aad bay u xanuunsanaysay. Maalin maalmaha ka mid ah iyadoo tareen la socota ayay heshay fikrad aad u qancisay aadna ugu weynaatay. Waxay ka fikirtay inay qorto buug sheeko ah oo ku saabsanaa wiil isagoo dugsiga baranaya is ogaaday inuu saaxir yahay.

Joanne waxay bilawday inay qorto novel-keedii ugu horeeyay, balse ka hor intii aanay dhamayn hooyadeed ayaa dhimatay. Geeridaa ku timid hooyadeedna waxay noqotay mid argagax ku noqotay ilaa ay saamayn balaadhan ku yeelatay qaabkii ay wax u qoraysay markii buugu sii dhamaanayay.

Joanne waxaa laga eryaya shaqadii ay ka shaqaynaysay sababtuna waxay ahayd waxaa lagu qabtay iyadoo wax qoraysa xagii ay ka shaqayn lahayd. Sanado yar gudahood waxaa laga eryay shaqooyin badan waxaanay la daalaa dhacaysay sidii ay u heli lahayd meel uu dakhli ka soo galo.

Intaa kadib waxaa ku adkaatay inay hesho shaqo sababtoo ah may ahayn qof yar manay lahayn mihnad iyo taariikh shaqo oo fiican.

## Go'aan Qaadashada, Rajada Adag iyo Adkayasiga

Kadib markii ay dhamaysay saddexdii cutub ee ugu horeeyay buugeeda oo la odhan jiray Harry Potter Novel, waxay bilawday buugii meelaha buugaagta lagu soo saaro, waxaanay kala kulantay war naxdin leh. Waxaa la diiday in la aqbalo oo la soo saaro buugedii.

Joanne waxay sheegtay in tani ahayd markii labaad ee ugu xumayd nolosheeda " markii hore waxay ahayd dhimashadii hooyadeed". Intaa kadib Joanne may


Copyright © 2016

quusan waxaanay bilawday inay udirto buugeedii meelo kale oo lagu soo saaro buugaagta balse la yaabkeeda 12 meelood oo kale oo lagu soo saaro buugaagta ayaa diiday buugeedii.

Hooyo kaligeed ah, aan wax shaqo ama mihnad toona aan lahayn oo aragtay riyadeedii oo sii burburaysa. Waa xaaladii ay waqti Joanne ku sugnayd.

Balse sababo jira aawadood may quusan ismanay dhiibin, waxaanay sii waday inay la xidhiidho meelihii lagu soo saari jiray buugaagta ilaa mid ka mid ah qoladii buugaagta soo saaraysay uu ku siiyay buugeedii 4000 oo dollar.

## Lacagta iyo Caanimada

Buugii waa la daabacay waxaana loo tixgaliyay inuu noqday buug guulaystay . Joanne aad ayay u faraxday waxaanay go'aansatay inay sii wado riyadeedii. Waqti aad u yar kadib waxay ku iibisay koobiga buug kale oo ay qortay 100,000 oo dollar.


Buugii hore ee ay qortay ee ciwaankiisu ahaa Harry potter wuxuu bilaabay inuu u faafo sida dabka oo kale. Ilaa tukaamadii iibinayay buugaagta kuyuu loo soo gali jiray si ay dadku u helaan buugaa.

Wax yar kadib Joanne waxay ka helaysay lacag aad u badan meelihii lagu daabici jiray buugaagteeda. Buugaagteedii waxay noqdeen kuwa loogu iibshada badan yahay mudo 5 sano ah.

Joanne markii dambe waxay ka heshay codsi mid ka mid ah dadka filimaanta soo saara in buugeedii sheekada ahaa loo badalo filim. Wax yar kadib Joanne waxay ka heshay 200 million oo dollar  filimkii laga sameeyay buugeedii.

Joanne waxay noqotay qoraagii ugu horeeyay taariikhda ee noqda bilyaneer waxaanay imika tahay mid ka mid ah dumarka ugu taajirsan aduunka.


Copyright © 2016




## Casharadii laga bartay Joanne

1. Udagaalan waxaa rumaysantahay xataa haday dadka khabiirada ahi ku diidaan: Joanne waxaa diiday 12 madbacadood oo buugaagta soo saara hadana waxay sii waday isku daygeeda sababtoo ah waxay rumaysnayd awoodeeda ay ku qori karto sheekooyin.
2. Xataa markay noloshu kugu adkaato hore u soco: nolosha Joanne waxay dhab ahaan ahayd mid adag. Waxay ku qori jirtay buugeedi ugu horeeyay meel maqaaxi ah iyadoo inanta yar ee ay dhashay dhabta ugu jiifto. Waxay soo martay dib u dhacyo iyo waqtiyo argagaxleh balse way sii waday manay niyad jabin ilaa ay ka noqotay gabadhaa caanka ah ee maanta la yaqaano J.K. Rowling.
3. Waxaad ka soo bilaabi kartaa meel aad u hooseeysa waanad guulaysan kartaa: Joanne may haysan wax ay ku bilawdo marka laga yimaado riyooyinkeeda iyo hiwaayadaa ay jeclayd, balse waxay cadaysay in hiwaayada iyo riyadu ay ka awood badan yihiin dhamaan hantida kale ee caalamka taala.

C.risaq Faarax Cawad
www.youtube.com/c/waxkabarro
Wax Ka Barro Channel
Copyright © 2016

# Sheekadii Guusha Ee Dhirubhai Ambani


Dhirubhai Ambani. wuxuu tusaale kaloo weyn u yahay dadka kasoo bilaabay eber-ka, ee raacay riyooyinkiisii islamarkaana run ka dhigay.

Dhirubhai wuxuu ku dhashay India. Aabihii wuxuu ahaa macalin qoyskiisuna may lahayn lacag badan. Markii uu 16 jir ahaa wuxuu u socdaalay dalka yemen halkaasi oo uu ka bilaabay shaqadiisii ugu horeysay. Wax yar kadib Dhirubhai wuxuu ku noqday dalkiisii India wuxuuna aasaasay ganacsi uu qof kale sheer kula ahaa, balse wax si fiican ugumay qabsoomin qofkii ay sheerka ku ahaayeen shirkadana way kala tageen.

Dhirubhai wuxuu ka waynaa 30 jir markii uu bilaabay shirkadiisii labaad. Wax yar kadib shirkadii uu aasaasay waxay noqotay mid caan ah, wax yar kadibna wuxuu noqday Bilyaneer.

Dhirubhai waxaa marar badan lagu magacaabay website-ka caanka ah ee Forbes, waxaa loo doortay inuu ka mid yahay raga ganacsadayaasha ah ee ugu sareeya qaarada eeshiya, hantidiisa dhaqaale ee uu haystaana maanta waxay u qalantaa 60 Bilyan oo dollar. Dhirubhai wuxuu dhintay 2002.


Copyright © 2016




## Casharada laga barran Karo Sheekada Dhirubhai Ambani

Noloshii Dhirubhai Ambani waxay inoogu filantahay inay ina siiso xaqiiqooyin aasi kara fikradaha khuraafaadka ah ee ay dadku ka aaminsan yihiin guusha. Fikradahaa khuraafaadka ah waxaa ka mid ah.

1. Dadka faqiiriinta ahi ma guulaysan karaan: Dhirubhai wuxuu ka dhashay qoys faqiiriin ah, waxaanu ka soo bilaabay meel aad u hooseysa, hadana wuxuu noqday mid ka mid ah dadka ugu taajirsan caalamka oo dhan. Meesha aad ka bilaabaysa micno weyn samayn mayso haddii aad u jeelantahay inaad guul gaadho.
2. Inaad waqti Dambe bilawdaa waa wax caadi ah: Dhirubhai wuxuu ahaa 32 jir markii uu bilaabay kambanigiisii labaad. Marka aad hadaf leedahay ee aad u jeelantahay gaadhida hadafkaa, waqti aad bilaabaysaa macno weyn samayn maayo. Dadka qaar ayaa guusha gaadha markay 40 jir yihiin, qaar baa gaadha markay 50 jir yihiin xaga qaar kalana gaadhaan da'a intaa ka dambaysa.
3. Meel kastood ku nooshahayba guul waad gaadhi kartaa: Dad badan ayaa rumaysan in meesha aad ku dhalatay ay saamayn balaadhan ku leedahay sida aad guusha u gaadhayso. Haddii aad aaminsantahay inaad guul weyn gaadhi lahayd hadaad maraykan ku noolaan lahayd waad qaldan tahay. Haddii aad tahay qof raba inuu guul gaadho, meelkasta oo aad joogtaba waad gaadhi kartaa guul.


Copyright © 2016

4. Waan guuldaraystay mana guulaysan karayo: Dhirubhai wuu ku guuldaraystay ganacsigiisii koowaad markii qofkii ay share-ka lahaayeen kaga baxay, balse muu quusan wuuna sii waday isku daygiisa ilaa uu dhab ka dhigay riyadiisii oo uu xaqiijiyay.

Dadka nolosha guulaha ka gaadhay waxay cadayn toos ah u yihiin in halka aad ka bilaabayso, noloshaada adag iyo cudurdaarada aad samaynaysaa aanay ku joojin karin.

Dhirubhai wuxuu samayn karayay boqol cudurdaar, qofna muu eedeeyeen balse wuxuu doortay inuu geesi noqdo taasina waa sababta uu ugu guulaystay hadafyadiisii.

Laba mid uunbaad noloshaada samayn kartaa, waa ta kowaade inaad geesi noqoto oo aanad ka hadhin riyooyinkaaga ilaa aad ka guulaysanayo ama inaad hesho cudurdaaro aad kaga meeraysato inaad guul gaadho, oo aad rumaysato cudurdaaradaa.

## Sheekadii guusha ee Coca-cola

Uma malaynayo inuu jiro qof aduunka ku nool oon wali maqal sharaab coca cola la yidhaa. Cocola waa shirkad sharaabka soo saarta oo lagu qiyaasay hantideeda in ka badan 160 bilyan oo dollar, sanadkastana waxay iibisaa in ka badan 40 bilyan oo dollar, caalamkoo dhana waa laga helaa.

Dad badan ayaan fahansanayn siday guushu u dhacdo, waxayna ka haystaan fikrado qaldan, fikradahaa way aaminaan, waxaanay ka dhigtaan wax xaqiiq ah oo jira.

Qofka iska caadiga ahi wuxuu umalayn doonaa in shirkadan Coca cola uu bilaabay qof milyaneer ahi, si fudud uu ugu balaadhiyay aduunkoo dhan, balse xaqiiq ahaan ninkii bilaabay shirkadan sharaabka oo la odhan jiray John Pemberton wuxuu ahaa nin farmasii iibiya ( meesha dawooyinka lagu iibiyo ).


Copyright © 2016

Wuxuu si qalad ah oo aanu ugu talo galin u soo saaray oo uu u ogaaday isku jirka sharaabka, waxaanu isku dayay inuu ka iibiyo wixii uu soo saaray farmasi kale oo agtiisa ahaa 5 centi ayaanu ka siiyay koobkiiba.

Sanadkii horeeyay Coca cola wuxuu iibiyay 9 caagadood oo sharaaba maalintiiba. Sanadka dhamaadkiisiina wuxuu wuxuu shaqeeyay lacag gaadhaysa 50 dollar, 73 dollar-na wuxuu ku bixiyay xayaysiinta sharaabkaa. Waxaanad arki kartaa inuu khasaaray sanadkaa.

Sanado kadib niman ganacsato ah ayaa kaga iibsaday ninkii aasaasay lacag gaadhaysa $2300, sanado kadibna waxay noqotay shirkadaa weyn ee aynu maanta naqaano.

Ma ogaatay sida hooseeysa ee u ku bilaabmay ganacsigan?

Sidoo kale ma ogaatay sida uu u noqday ganacsi weyn?




## Casharada laga baran karo sheekadan ?

Waxaa jira casharo aad u muhiim ah oo aynu ka baran karno sheekadan.

1. Waxaad ka bilaabi kartaa meel aad u hooseeysa waxaanad gaadhi kartaa meel aad u saraysa : shirkadaa dhan waxaa laga bilaabay meel farmasii ah, sanadkii ugu horeeyayna wax faa'ido ah may samayn. Dad badan ayaa u maleeya in inaad wax bilawdaa ay u baahantahay wax weyn si aad meel weyn u gaadho, taasina waa fikir qaldan oo ay ka aaminsan yihiin guusha.
2. Waa wax iska caadi ah in aanad wax natiijo ah arag bilawga hore : aan ku waydiiyo su'aal. Maxaad samayn lahayd haddii sharaab cusub oo aad


Copyright © 2016

soo saartay laga iibsado 9 cabitaan oo kaliya sanad dhan? Miyaad niyad jabi lahayd ood joojin lahayd? Dad badan ayaa u maleeya in ay tahay inay marka hore natiijo helaan si ay u sii wadaan, balse xaqiiqdu waxay tahay natiijada aad rabtaa waxay imanaysaa markaad sii wado.

3. Waxaad heshaa waxaad u qalanto markaad sii wado dadaalkaaga: coca cola waa sharaab cajiib ah, waxaanu u qalmaa inuu caan noqdo balse haddii ninkii aasaasay uu niyad jabi oo uu joojin lahaa markuu iibiyay 9 cabitaan sanad dhan heerkan muu soo gaadheen. Haddii aan si kale u dhigno haddii fikirkaagu yahay fikir aad u fiican haka rajayn inay dadku hore ka taageeri doonaan ilaa aad samayso dadaal aad u badan mooyaane.

## Bal adiga kawaran?

Bal hadaba adigu isku noqo?

Maxa kaa hortaagan ee dib kaaga haya inaad gaadho hadafyadaada?

Ma dadkaa diiday fikradahaaga? Dad badan oo maanta guul ka gaadhay nolosha raadna ku reebay aduunka ayaa la diiday fikradahooga, balse waxa u suurto galiyay inay sida cadceeda uga soo muuqdaan adduunka intiisa kale waa quusasho la'aanta iyo sii wadista. Lacag kugu filan mahaysatid miyaa? Coca Cola-ha aad arkayso fikradiisu waxay aad uga liidatay fikirka aad maanta hayso.

Dad badan ayaa waxaa curyaamiya fikirkadaha beenta ah ee ay guusha ka haystaan, xagii ay xaqiiqda ka arki lahaayeen. Haddii ay xaqiiqda arki lahaayeen waxay qiri lahaayeen inay u halgamaan fikradahooga ayna waajahaan caqabadaha ay la kulmi lahaayeen.

Waxa aad kuugu fudud inaad tidhaahdo " ma haysto lacag igu filan oo aan ku bilaabo ganacsi" " nasiibkaygu ma fiicna" xagii uu ka qiri lahayd inaad masuul buuxa ka tahay natiijooyinka aad helayso noloshaada.

Ma garanaysaa sababta ay dad badani fikir been ah uga haystan guusha? Sababtoo ah dadkaasi mala dhiiranaan ay ku qirtaan inay badali karaan noloshoda.


Copyright © 2016

# Sheekadii Guusha Ee Nic Vujicic

Dadku badanaa markay la kulmaan duruufo adag laba dookh mid uunbay sameeyaan inay isdhiiban oo ay rajo dhigaan ama inay waajahaan oo ay la dagaalamaan duruufahaa adag. Badanaana dookhani waa waxa go'aamiya sida ay noqonayso nolosha qofkaasi.

Inaad si xoogan u aaminsanaato riyooyinkaagu waa waxa kugu taageeri kara halgankaaga aad kaga soo horjeedo rajo la'aanta. Yeelashada damac xoogan iyo go'aan aad guul ku gaadhaa waa waxa kaliya ee kuu rumayn kara hadaf aad leedahay isla markaana ku siin kara rajo xoogan oo aad kaga gudbi karto dhamaan caqabadaha aad waajahayso.

Farxada iyo badhaadhuhu waxa suurtogal ah inay umuuqdaan waxay adag tahay in la helo, balse waxaan shaki ku jirin inay sugayaan inay kugu abaal mariyaan dhamaadka wado ay ka sokeeyaan shaqo adag iyo halgan badani waa haddii aad go'aansato inaad raacdo wadadaa.

Qofka bili'aadanka ahi wuxuu guuldaraystaa oo kaliya markuu aamino in aanu gaadhi karin riyooyinkiisa.

Inaad fuusho salaan dheeri dhab ahaan wax khatarteeda leh, balse waa inaad fuushaa haddii aad rabto inaad gaadho ujeedkaaga, sababtoo ah hadii aanad fuulin fursada kaleed haysataa waa inaad hoostaagnaato uun salaanka oo aad ka cabato uun siday noloshu u adagtahay.

## Sida Loo Helo Waxaad Rabto Nolosha Adoon u Eegayn Waxaa aad haysato.

Nick Vujicic waxa uu 1982 ku dhashay melbourne oo tirsan dalka australia, waxaanu dhashay xanuun bili'aadanka mar mar iyo dhif lagu arko, kaasi oo ah inuu dhashay isagooy ka maqan yihiin afartiisii adin( labadii lugood iyo labadii gacmoodba). Markii ugu horeysay ee uu dhashay hooyadii waxay diiday inay aragto amase ay qabato iyadoo kalkaalisadii ay u haysay mudo, markii dambe waxay ku qanceen Markii uu yaraa curyaanimada Vujicic waxay ku sababtay


Copyright © 2016

inuu waajaho halgan muuqaaleed iyo mid dareen ahba.



Sharciyada dalkiisa u yaala umay suurtogalin inuu ku biiro iskuul fiican, waxyar kadib markii loo ogolaaday inuu ku biiro iskuulkiina wuxuu cadaadis iyo xoog sheegasho kala kulmay ardaydii ay dugsiga wada baranayeen taasi oo ku sababtay inay murugo aad ubadani haleesho markii uu 8 jir ahaa. Markii uu 10 jir noqday wuxuu iskudayay inuu isdilo markii uu u adkaysan waayay noloshuu ku sugan yahay.

Vujicic hamigiisu wuxuu ahaa inuu ku noolaado nolol guul leh, islamarkaana uu yeesho awood uu kaga gudbo dhamaan ayaandarooyinkan haleelay si uu guul u gaadho.

Inkastoo aanu lahayn wax adimo ah, hadana kamuu fikiri jirin waxaanu haysan, balse si sidaa kasoo horjeeda mid kamid cagihiisa aad ka u dhumucda yar oo lahayd laba farood ayaa ku  hogaamisay nolol barwaaqo ah. Wuxuu bartay sida loo isticmaalo computer-ka waxaanu halkii minute ba qori karaa 40 xaraf.

Sidoo kale wuxuu awood u yeeshay inuu tuuro kubada tenniska, inuu qabsado galaas biyo ah,inuu shanleeyo timihiisa,inuu cadayo ilkihiisa, inuu taleefanka u


Copyright © 2016

jawaabo, islamarkaana uu gadhka xiirto. Wuxuu ciyaari kartaa noocyo badan oo kamid ah sportiga sida golf-ta, dabaasha,iyo waxa loo yaqaano skydiving. Waxa uu laba bachelor degree ah ka diyaariyay xisaabaadka iyo dhaqaalaha.

Vujicic wuxuu ku guulaystay inuu noqdo qof dadka dhiirigaliya, waxaanu u socdaalay dhamaan aduunkoo dhan, isagoo lahadlay 3 milyan oo qof oo ku kala nool in kabadan 44 wadan. Isagoo barayay dadka sida loo rumeeyo riyooyinkooga. Waxaana ka mid ah hadaladiisa ugu caansan markuu dadka dhiirigalinayo “Dream big my friend and never give up. We all make mistakes but none of us are mistakes.”

Markii dambe wuxuu aasaasay urur loo yidhaa " life without limbs" iyo shirkad la yidhaa " attitude is altitude". sanadkii 2005 waxaa loo magacaabay abaalmarintii sanadka ee dhalinta australia. 2002 wuxuu guursaday Kanae Miyahara waxaanu dhalay laba caruur ah.

Sheekadan Nic Vidicic waxay indhaheena u furaysaa xaqiiqda ah in daciifnimadu ay ku dhacdo qalbiga balse aanay ahayn jidhkaagoo si fiican u shaqayn waaya. Dhiirigalin la'aantuna tahay xanuun ku dhaca maskaxda balse aanay ahayn jidhka. Isagoo arintan ka hadlayana wuxuu yidhi " curyaanimo ta ugu weyni waa cabsida waxaanay kuu qalalin doontaa si kadaran kursiga curyaanka.  Hadaba waa maxay cudurdaarkaagu.


Copyright © 2016

# Sheekadii Guusha Ee Subhreet Kaur

## Miyay Waxyaabo Aad Xadaysatay Dib Kaaga Hayaan inaad ku guulaysato hadafkaaga ?

Goormay markii kuugu dambaysay eed aamintay in aanad waxba qaban karin?

Goormay ahayd markii kuugu dambaysay eed aamintay inay jiraan waxyaabo aanad dhaafi karin oo kaa hortaagan inaad gaadho hadafyadaada?

Goormay markii kuugu dambaysay eed aamintay inaanad lahayn hanti aad ku gaadhi karto hadafyadaada.

Subhreet Kaur waa gabadh u dhalatay dalka India oo lug kaliya leh, lugteedii kalana ku wayday shil baabuur oo ay gashay. Subhreet waxay go'aansatay inay noqoto qof ciyaara jaaska iyadoo lug kaliya leh, waxaanay bilawday in si joogto ah u tababarato. Waxay ku sii xoogaystay jacaylkii ay u qabtay inay noqoto jaasaa caan ah waxaanay cadaysay in aanay jirin waxaan suurto gal ahayni.

Subhreet waxay ka qayb gashay tartanka la yidhaa " India's  Got Talent" waxaana loo doortay inay ka mid noqoto dadka ka qayb qaadanaya.

Markii ay bilawday jaaskeedii waxay u jaastay si aanay dadka caadiga ahi aanay u jaasin, waxaana sacab ula kacay, fadhigana uga kacay garsoorayaashii tartanka waday. Agteerka Salman Khan Oo kamid aha garsoorayaashii meesha joogay ayaa yaab awgii ku dhawaaday inuu khalkhalo isna xejin kari waayay. Waxaanay ku guulaysatay tartankii iyadoo ka guulaysatay dad badan oo


Copyright © 2016

laxaadkoodu dhamaystirna waxaanay noqotay qof caan ah.



Hadaba imika waxaa jira su'aalo ay aad u muhiim tahay inaad waydiiso naftaada.

Hadii aad taagnaan lahayd booska inantaa, oo aad u sheegto saaxiibadaa inaad doonayso inaad barato sida loo jaaso, maxay noqon lahayd jawaab celinta saaxiibadaa.

Miyuu qofna kuu sheegi lahaa inay suurto gal noqon karto?

Iska ilawba saaxiibadaa, sideebay maskaxdaadu kuugu jawaabi lahayd haddii aad naftaada u sheegi lahayd inaad baranayso sida loo jaaso.

Miyay maskaxdaadu kuu sheegi lahayd inay suurtogal tahay inaad la tartanto dad laxaadkoodu u dhamaystiran yahay adoo lug kaliya leh ? mise maskaxdaadu waxay kuu soo diri lahayd fikiro taban oo ay kuugu sheegayso inaanay suurto gal ahayn.

Dadka curyaamiinta ahi maaha dadka ay ka maqan yihiin qayb ka mid ah laxaadkoodu balse waa kuwa ka aaminay nolosha fikiro been ah oo si toos ah u curyaamiyay inkastoo ay leeyihiin jidh caafimaad qaba.


Copyright © 2016

## Curyaanimada Dhabta ah

Waxyaabaha xadida awooda qofka ee ka joojiya inuu hadafkiisa gaadhaa ma'aha qofka oon haysan hanti ama wax kale oo u suurtogaliya inuu gaadho hadafkiisa balse waa fikir qaldan ee uu qofku aamino. Haddii aad tahay qofka ugu awooda badan aduunka balse aad aaminsantahay inaad daciif tahay waligaa ku guulaysan maysid in meel gaadho.

Dhinaca kale haddii aad qof curyaan ah tahay, balse aad leedahay fikir caafimad qaba, waxaa samayn doontaa guulo  aan inaba caadi ahayn, kuwaas oo dadka muuqaal ahaan u caafimaad qabaa aanay gaadhi karin.

Guushu gabi ahaanba waxay ku xidhan tahay waxyaababa aad aaminsan tahay ee ka dhex guuxaya maskaxdaada.


Copyright © 2016

# Sheekada Dhiirigalinta leh ee Larry Swilling

Waligaa Ma u malaysay in hadafyadaadu ay yihiin qaar aade u adag oon la gaadhi karin?

Waliga ma istidhi inaad aad uga waynaatay waqtigii aad hadafyadaada gaadhi lahayd?

Waligaa ma isku dayday inaad gaadho hadafyadaada hadana ma quusatay oo ma rajo dhigtay ka hor intaadan gaadhin?

Haddii aad HAA  kaga jawaabtay mid kamid ah su'aalahaa waxaad u baahan tahay inaad ogaato sheekada Larry Swiling.

Larry waa nin 77 jir ah, waana nin naxariis badan oo xaaskiisa si  aad u jeclaa. Waxa ay isqabeen xaaskiisa 57 sano waxaanu gaadhay heer aanu qiyaasi karin sida ay noloshiisu noqon lahayd iyada la'aanteed !

Balse nasiib xumo, xaaskii Larry waxa ku dhacay kalyo xanuun waxaana loo sheegay in kali ka mid ah kalyaha xaaskiisu ay shaqadii joojisay, ayna tahay in dhakhtar la dhigo. Larry wuxuu ogaa in haddii xaaskiisa loogu deeqo kali ay badbaadi karto balse muu garanayn cid uu kali uwaydiiyo oo ugu deeqda xaaskiisa.

Markii uu dayday waxoogaa qof kali u saara xaaskiisa, nasiib umuu yeelan inuu helo , balse wuxuu sameeyay wax layaab leh, wuxuu qaatay loox uu ku qoray " kali ayaan ugu baahanahay xaaskayga" waxaanu iskaga dhajiyay xaga hore.

Larry wuxuu bilaabay inuu socod ku maro wadooyinka saacado badan maalin walba. Sidoo kale Larry wuu shaqayn jiray, waxaanu socdaalkiisa uu ugu daydayayo kalida xaaskiisa uu bilaabi jiray kadib markuu dhameeyo


Copyright © 2016

shaqaadiisa.




Larry wuxuu lugeeyay in ka badan 250 mile. Maalin ayaa wuxuu lugeeyay 15 mayl iyadoo cimiladu aad u xumayd aadna u kulalayd. Sidoo kale Larry waxay dhibaato ka haysatay oo xanuunayay jilbaha waxaana ku adkayd inuu xataa lugeeyo.

Dadku waxay ugu deeqayeen lacag balse wuxuu ugu jawaabayay " waad ku mahadsan tihiin, waxaan xaaskayga u rabaa oo kaliya kali si aan u badbaadiyo"

Larry wuxuu lugaynayay sanad dhamaystiran! Ilaa uu noqday 78 jir! HAA sanad dhan ayuu raadinayay markii ugu dambaysayna wuxuu helay qof ugu deeqa xaaskiisi kali, waanu badbaadiyay xaaskiisii"

Larry wuxuu ku badbaadiyay xaaskiisii uu jeclaa sababtoo ah wuxuu lahaa rajo iyo go'aan dhagax ah.

## Waayihii adkaa ee uu Larry waajahay !

- Waqti muu haysan sababtoo ah wuxuu gudanayay shaqadiisa maalin laha ah
- Lacag ku filan muu haysan xaaskiisuna waxay u baahnayd 4000 dollar bishiiba si loo daweeyo.
- Da'diisu waxay ahayd 78 jir.
- Wuxuu raadinayay waxay adag tahay in la helo


Copyright © 2016

- Xaaladiisa caafimaad may ahayn mid saa u fiican



## Bal hadaba adigu isku noqo

Waa maxay cudurdaarkaagu?

Miyay hadafyadaadu dhab ahaan adag yihiin in la gaadho?

Imisa mayl ayaad u lugaysay si aad u gaadho?

Imisa jir baad tahay?

Miyaad u dagaalamaysaa waxaad dhab ahaan urabto nolosha?

Haddii aad ugu dagaalami lahayd oo waxa aad doonayso si la mid ah sidaa uu Larry ugu dagaalamay inuu xaaskiisa badbaadiyo waxaa hubaal ah inad maalin gaadhi lahayd hadafkaaga.

Waa wax aad u fudud inuu qofku la yimaado cudur daar uu ku eedayn karo qof dhibaatooyinka isaga haysta. Inaad naftaada been u sheegtaa waa mid ka mid ah wadooyinka ugu dhaw ee kugu hogaamiya guuldarada. Haddii aad rabto sida ay dhab ahaan u dhacdo guushu waa dareenkaaga islamarkaana aad tixgalisaa sida sheekooyinka dadka guusha gaadhay sida ninkan Larry Swilling. Ninkan 78 jirka ah ee u lugeeyay 250 mile si uu u badbaadiyo xaaskiisa kuna guulaysatay.


Copyright © 2016

# Sheekadii Ganacsade Somali ah Oo ku Taajiray 15 Dollar

Haddii aad u fiirsato dhamaan sheekooyinka ku taxaluqa dadka guusha gaadhay, magacyada, jinsiyada iyo meesha lagu noolyahayba ha ku kala duwanaatee waxaa dhab ah inay ka midaysan caqabada iyo duruufaha kala gadisan ee ay waajahaan intay ku gudo jiraan socdaalkooda guusha iyo sida ay uga dabaashaan caqabadahaa.

Saleebaan Maxamed Faarax wuxuu sanadkii 1994 ganacsigiisa ku bilaabay tanag timir ah oo uu dulsaaray miis iyo dalaayad uu ka qotomiyay meel dhinaca ku haysa jidadka waaweyn ee magaalada Hargeysa  mid kood oo ku dhexyaala goob suuq ah oo noocyo kala duwan oo ganacsi ahi ka socdaan.

Waxay ahayd waqti adag oo gobolada waqooyi ay markii uun ka soo kabanayeen dagaalo mudo socday oo ay lagu waayay mood iyo noolba barakac baahsana sababay. Waxay ahayd waqti nolosha dadka ku dhaqan Hargeysi  ay aad u adkayd iyadooy ugu wacnayd deganaansho la'aan dhinaca amaanka ah, sicir bararka maciishada oo aad u sareeyay iyo dhibaatooyin kale oo badan.

Markii uu iibsaday tanaga timirta ah ee uu ganacsigiisa ku bilaabay wuxuu siistay 21 dollar oo uu soo amaahday, waxaanu maalintiiba ka faa'idi jiray hal dollar oo kaliya. Wuxuu ahaa qof aaminsan naftiisa, isla markaana aaminsan inuu ka dhabayn karo horumarna ka gaadhi karo ganacsigaa yar ee uu bilaabay.

Maxamed markii uu mudo bil iyo badh ah waday ka ganacsiga ee uu faa'ido yar ka qabtay timirtii uu iibinayay ayaa wuxuu bilaabay inuu ku soo kordhiyay miiskii laws iyo cananis uu xidh xidhi jiray. Markii uu waxooga faa'ido ka qabtay intii ayaa wuxuu uga digo rogtay inuu iibiyo dharka bacadlaha isagoo iibin jiray kabo iyo dhar ay dadka danyarta ah xidhaan isagoo markii dambe ganacisigiisii u sii balaadhiyay inuu keeno daahyada guryaha lagu xidho, taasina ay u saamaxayday inuu madaxa la galo nooca ganacsiga uu maanta ku gudo oo ka kooban qalabka qurxinta guriga iyo qalabaynta xafiisyada.

Maxamed Saleebaan haatan astaantiisa iyo magaca meheradiisa waxaa si weyn looga yaqaana gayiga somalidu dagto. Isagoo ay alaabtu uga soo dagto


Copyright © 2016

wadamada dibada sida Shiinaha iyo Turkiga, Qaar badan oo alaabtiisa ahna lagu farsameeyaa wadanka gudihiisa.

Maxamed Saleeban Imika waa Mulkiilaha mid kamid ah shirkadaha ugu sanka dheer ee ka ganacsada qalabka guryaha iyo xafiisyada waxaana la yidhaa shirkadiisa AL-XAYAAT FURNITURE AND HOME DECORATION.

Maxamed waa waqtigan xadigiisa maaliyadeed lagu qiyaasaa adduun gaadhaya dhawr Million oo dollar oo uu ka bilaabay 15 dollar oo uu siistay tanag timir ah, isagoo aanu qofna caawin.

## Casharada aan ka barran karno sheekadan:

- Adoo ka bilaabay meel hoose ayaad gaadhi kartaa meel sare: Maxamed wuxuu ka bilaabay ganacsigiisa 15 dollar oo siistay tanag timir ah maanta hantidiisu waxay gaadhaysaa dhawr MILYAN oo dollar. Haddii aaminsantahay awoodahaaga iyo inaad guul gaadhi karto meel hoosaba aad ka bilawdide waxaa shaki ku jirin inaad maalin uun gaadhi doonto halkaad rabto.
- Isbad-badal yeelo: Maxamed ganacsigiisa wuxuu ku bilaabay tanag timir ah balse kumuu joogsan intaas oo kali ah ee wuxuu ku fikiray sidii uu u balaadhin lahaa ganacsigiisa si uu u gaadho yoolkiisa oo ah inuu noqdo ganacsade weyn.
- Ku fikir inaad samaysato ganacsi: Maxamed wuu awooday inuu shaqo uu nolol maal-meedkiisa ku dabaro helo balse wuxuu ka doorbiday inuu samaysto ganacsigiisa walow faa'idaduu ka helayaa haba yaraatee. Haddii aad ku fikirto uun inaad shaqaale ahaato waxaa dhab inaanad horumar la taaban karo kaa gaadhi doonin waligaa, sikasta oo aad u shaqaysana lacagta lagu siinayaa ay ahaan doonto mid kooban. Balse hadaad ganacsi furato faa'idadaadu waxay noqon doontaa mid xad lahayn.
- Jooji inaad ka cabato caawimaad la'aan: Maxamed intii uu horumarkaa samaynayay ma jirin qof ka caawiyay isla markaana soo gacan qabtay. Inaad cudurdaar samaysataa waa wax fudud balse ogow inay dhabar jab


Copyright © 2016

ku tahay horumarkaaga iyo ogaato awoodahaaga ayna kuu horseedayso guuldaro.

- Adna Sidoo kale waad samayn kartaa: Wuxuu Maxamed ka soo bilaabay meel aad u hooseysa, manuu haysan wax ka badan inta laga yaabo intaad maanta haysato, xaqiiq ahaan waxa laga yaabaa in waxa aad maanta haysataa ay ka badan tahay intuu haystay. Hadalkoo gaaban sidoo kale waad samayn kartaa.

## Miyaad ka habsaantay waqtigii guul ka gaadhi lahayd nolosha (sheeko)

Ma u malaynaysaa inaad ka dib dhacday xiligaad inaad guul gaadho?

Ma umalaynaysaa inaanad dhaafi karin waayaha iyo caqabadaha badan ee aad waajahayso nolosha?

Ma umalaynaysaa in waqtigan aad joogto aanay gabi ahaanba suurto gal ahayn inaad guul gaadhaa?

Haddii Haa kaga jawaabtay su'aal kamid ah su'aalahaa waa akhridaa sheekadan, sababtoo waxay kuu saamixi doontaa inaad ogaato waxyaabo badan oo aanad ka ogayn nolosha. Susan Boyle waa gabadh waxay dhalatay iyadoo iyadoo maskaxda uu dhaawac sahlani kagaadhay iyadoo dhaawacaa uu ugu wacnaa khalad uu sameeyay dhakhtarku markii ay dhalanaysay.

Sanadihii ugu horeeyay ee nolosheeda waxay jeclaatay musiga, waxaanay jeclayd inay noqoto qof musikiiste ah, balse iyadoon ahayn qof soo jiidasho leh waxaa niyad jabiyay dad badan oo ku agnoolaa.

Qoyskeedu waxaa haysatay dhibaato dhaqaale la'aan ah, tana waxay culay kale ku sii dartay culayskii horee haystay. Sanadkii 1995 waxay codsatay inay ka qayb qaadato bandhig lagu so bandhigo dadka kartida iyo hibooyinka leh balse codsigeedii waa la diiday.

Susan waxay sii waday inay wali aaminsanaato riyadeedii ahayd inay noqoto heesaa caan ah, balse laba sano kadib aabaheed ayaa dhintay, sanado kadibna walaasheed ayaa sidoo kale dhimatay. Inkastoo ay nolosheedu ay la kulmaysay


Copyright © 2016

waxaas oo dhibaato ah, wali waxay sii wadatay aaminsanaanta riyadeedii kamanay quusan.

## Sii wadistii riyada

Sanadkii 2007 hooyadii dhashay Susan, qofkii kali ahaa ee adduunka dhan ka siinayay taageeraday u baahantahay ayaa sidoo kale dhimatay, waxaanay kali ku noqotay adduunka. Arintani markii ay dhacday Susan waxay ka niyad jabtay oo ay joojisay riyadeedii ahayd heesaha waxaanay dib ugu noqotay aqalkeedii yaraa.

Sanado badan oo silica kadib, Susan waxay go'aansatay inay marlabaad dib ugu dagaalanto riyadeedii waxaanay ku biirtay bandhig la odhan jiray Britain's got talent show,  oo lagu soo bandhigi jiray dadka hibooyinkooda iyo hawlkarnimadooda, waqtigaana ahaa halka meesha laga soo saaro hobolada (heesaayada) ingiriiska.

Iyadoo aaminsan in aanay ku guulaysanayn iyadooy ugu wacan tahay muuqaalkeeda iyadoo da'deedu Afartan jir kor u dhaaftay, haba yaraatee wax rajo ah kamay qabin inay noqon doonto heesaa caan ah, balse hadana way sii waday halgankeedii iyo dagaalkii ay ugu jirtay riyadaa.

Kadib 30 (soddon sano) oo ay u soo halgamaysay riyadeeda, waxay ugu dambayntii soo istaagtay masraxii bandhiga, waxaana ugu horeyn la waydiiyay intay da'deedu jirto waxaanay ku jawaabtay "waxaan ahay 47 jir" qofkastaaba afkuu gacanta ku qabsaday, garsoorihii bandhiga ayaa xataa madaxa qabsadayoo la yaabanaa, dhamaan dadkii meesha joogayna way ku qoslayeen kana maadsanayeen.

Balse markii ay ku bilawday, ee ay ku dhufatay heestii ayuu jawigu gabi ahaanba iska badalay sidii uu ahaa. Qofkastaaba wuu yaabay, yaab kaduwan kii hore, wuxuu la dhacay oo qofkastaaba codkeedii. Dhamaan wixii masraxa joogayna way u wada istaageen sacabka ayaana kala joogsan waayay.

Taabo linkigan si aad u daawato wixii dhacay.


Copyright © 2016

Dhawr cisho kadib bandhigeedii muuqaalkii laga duubay wuxuu noqday mid kamid ah kuwa loogu daawashada badan yahay youtube-ka, Susan waxay habeeno gudahood ku noqotay qof caan ah, albamkeedii ugu horeeyay oo la oo la odhan jiray " I dreamed a dream" oo Somali noqonaya"waxaan riyooday riyo" wuxuu noqday ka loogu iibsashada badan yahay UK waxaanu kaalmaha sare ka galay sidoo kale wadanka maraykanka.

Waxay ka samaysay iibinta albamkeedii ugu horeeyay 5 milyan oo lacagta ingiriiska ah, waxaanay markii dambe sii daysay albamkeedii labaad iyo saddexaad oo iyaguna sidoo kale aad u guulaystay. Sanadkii 2012 dhaqaalaha iyo hantida Susan waxaa lagu qiyaasay in ku dhaw 22 milyan oo Sterling. Dhamaad.



## Casharada Aadka u Qaaliga ah ee aan ka baranay sheekadan

1. curyaanimada dhabta ah: qofka dhab ahaan u curyaanka ahi waa qofka haysta caafimaad fiican, muuqaal ahaan aan lahayn curyaanimo kamuuqata hadana aan u dagaalamin hadafyadiisa sababtoo ah wuxuu aaminsan yahay in aanu guul gaadhi karin. Susan oo aynu nidhi maskaxday dhaawac yar ka qabtay runtii may ahayn qof curyaan ah, balse qofkasta oo ka rajo dhiga inuu dagaalamo hadafyadiisa ayaa curyaan dhaba ah.


Copyright © 2016

2. Xushmada waala kasbadaa: markii Susan ay soo istaagtay masraxa ninkii garsooraha ahaa si xun ayuu ula yaabanaa uguna jeesjeesayay markii uu waydiinayay su'aalaha, dhamaan daawadayaahsii meesha joogayna way ku qoslayeen! Balse markii dambe ee ay soo bandhigtay Susan codkeeda dhamaan wixii meesha joogay way u kaceen! Xushmada waa la kasbadaa.
3. Badanaa waxaa jirta rajo: Susan waxay ahayd qof maskax ahaan u dhaawacan oo maskaxda curyaan ka ah, waa loo awood sheegtay, meelkastana waa ladiiday, kaaga siidarane waxay mid mid u wayday dhamaan xubnihii qoyskeeda, hadana waxay ku maaraysay inay sii wado socdaalkeeda ugu dambayna way ku guulaysatay. Badanaa waxaa jirta rajo waxaan suurtogal ahayna ma jiraan.
4. Wali Cimri kaamuu tagin: Susan waxay bilawday inay heesto iyadoo 12 jir ah balse waxaa si fiican loo aqoonsaday markii ay noqotay 47 jir. Wali cimri kaamuu tagin waxaanad awood u leedahay inad riyooyinkaaga sii wadato. Waxaad badanaa bilaabi kartaa waqti kasta waxaanad heli kartaa waxa aad rabto balse waa inaad wadaa socdaalkaaga oo aanad quusan.
5. Waligaa ha joojin iskudayga: kawaran haddi aanay gabadhasi ka qayb kali lahayn bandhigaa? Kawaran haddii aan la arki lahaynba oo ay aamini lahayd in la diidi doono. Haddii ay ka rajo dhigi lahayd riyadeeda iyo hamigeeda maanta maynu maqalneen. Waxkastoo dhacaba waligaa ha quusan.

Haw ogolaan qofna inuu riyadaada u badalo wax laga xishoodo. U dagaalan waxa aad rabto riyadaadana ka dhig mid rumawda.


Copyright © 2016

# Sheekadii Guusha Ee Ibrahim Elfiqi

Sheekada Ibrahim Alfiki waa sheeko guul ah oo u qalanta in la sheego. I brahim Alfiki waa nin u huray noloshiisa intii ugu badnay inuu dadka kale baro sida looga gudbo caqabadaha ka hor yimaada intay ku jiraan socdaalka ay guusha ku rabaan. Ibrahim alfiki wuxuu noloshiisa intii ugu badnayd ku bixiyay sidii uu u faafin lahaa fikir iyo akhlaaq togan.

Wuxuu u arkay sheekada noloshiisa inay tahay tusaalaha ugu fiican ee qof gaadhay caanimo balaadhan iyo lacag isagoo kaliya aaminsanaa riyooyinkiisa ilaa ay dhab ka noqotay.

## Noloshii Hore Ee Ibrahim Alfiki iyo Sida Uu Heerka KU Gaadhay

Ibraahim Alfiqi noloshiisii hore waxay ahayd mid ka duwan nolosha dadka kale. Wuxuu ku dhashay dalka Masar sanadku markuu ahaa 1950. Wuxuu degree jaamacada ee ugu horeeyay ku qaatay kuliyada dalxiiska iyo Huteelada. Kadib qalin jabintiisii waxay sanadku markuu ahaa 1978 isaga iyo xaaskiisii u socdaaleen dalka Canada si ay u helaan nolol fiican. Markii uu yimiday dadkii uu la kulmay ee Canada joogay waxay u sheegeen inuu dalkiisii iskaga noqdo maadaama aanay waqtigaa wadankaa ka jirtay camal la'aani. Ibrahim Alfiki lacagtii uu markaa haystay waxay ahayd  $1000 oo kaliya dareenkaa xooganina muu niyad jabin balse Ibrahim wuxuu bilaabay inuu shaqo raadsado.

Wuxuu galay waraysi shaqo mid kamid ah huteelada dalka waxaanu u sheegay maamulihii hoteelku "Kuma haboonid shaqada huteealada" Ibrahim wuxuu ka tagay halkii isagoo niyad jabsan balse wuxuu go'aansaday in aanu quusan.

Laba maalmood gudahoodna wuxuu helay laba shaqo. Labada shaqo tii ugu fiicnaydna waxay ahayd inuu xalo ama dhaqo saabaanka ama weelka cuntada laga cuno mid ka mid ah hoteelada dalkaasi. Inkastoo shaqadaasi aanay ahayn ta ugu fiican hadana wuu aqbalay shaqadii isagoo ku adkaystay inuu socdaalkan kasoo bilaabo meel aad u hooseysa ilaa uu ka gaadhayo meel sare.

Ibrahim wuxuu si dag-dag ah horumar uga sameeyay shaqadiisii marba marka ka dambaysana wuu sii dalacayay ilaa uu markii dambe noqdayba maamulihii huteelka, intaa kadibna wuxuu ku guulaystay abaalmarin ah maamulaha ugu


Copyright © 2016

fiican huteelada ee waqooyiga America, intaa kadib hadana wuxuu noqday mid kamid ah dhiirigaliyaayasha ugu weyn ee dalka Canada, dhamaan Carabta iyo Wadamo kaloo badan.

Ibrahim wuxuu ku  casho casuumay ninkii huteelka lahaa ee markii ugu horeysay diiday intii ay ku jireen wada hadalkoodana wuxuu u sheegay inuu yahay wiilkii yaraa ee barigii diiday.



## Maxaynu Ka Barran Karnaa Sheekadan:

- Dadka Guulaha Gaadhaa Wax Muhiimad ah ma siiyaan diidmada: Ibrahim Alfiqi wuxuu takhasus-kiisu ahaa Hoteelada aqoon badana wuu u lahaa, balse markii ugu horeysay waxaa loo sheegay inaanu ku haboonayn ka shaqaynta huteelada, balse wuxuu ahaa qof aaminsan naftiisa dhagna umuu dhigin diidmadii lagala horyimiday ilaa uu markii dambe u cadeeyay qofkii diidanaa qaladkiisa. Hadii aad rabto inaad nolosha guul ka gaadho waa inaad ilawdaa diidmooyinka sababtoo badankoodu wax micno ah ma sameeyaa.
- Aamin Naftaada: Sideebuu qof uu sii wadan karaa socdaalkiisa isagoo la kulmaya diidmooyin badan hadana aan rajo dhigayn? Dhamaan dadka guulaha gaadhay waxay si adag u aaminsanaayeen naftooda taasina waa sababta diidmooyinku aanay u gilgilin kalsoonida ay ka qabaan naftooda.


Copyright © 2016

La Noolow oo jacaylka Illaahay, ku dhaqan sunaha nabigeena (Csw), Yeelo iimaan, Kuna mahadnaq waxaad haysato.

WAX KA BARRO CHANNEL

# DHAMAAD

C.risaq Faarax Cawad
www.youtube.com/c/waxkabarro
Wax Ka Barro Channel
Copyright © 2016